



Waxaa Naga Go'an Inaan Sii Wadno Ballanqaadkayagii Inay Ardaygu Guuleystaan

Sebtamber 22, 2022

Bulshada Qaaliga ah ee PPS,

Subaxani, Waaxda Waxbarashada Oregon bayaan cad oo ay soo saartay kuna saabsan xogtii qiimeynta guud ee gu'gii la soo dhaafay. Wuxaan aad ugu faraxsanahay inaan idinla wadaago in Dugsiyada Dadweynaha Portland ay baajiyeen in dib dhac weyni ku dhaco, laakiin xaalku si kastaba ha ahaadee waxay xogtu muujineysaa in [cudurkii faafayey saameynta taban uu ku lahaa.](#)

Sidoo kale tani waxay muujineysaa arrin aynu horeba uga warqabnay: iyada oo ay jireen waxyaabo la taaban karo oo ka socday dugsiyada PPS, ardaydeena Madowga ah, Maraykanka Asalka, iyo ardayda kale ee aan cadaanka ahayni ay soo wajahayeen dhibaatooyin, is-raacinta, iyo gaabiska dhinaca horumarka ee aan la aqbali karin.

Waxaa naga go'an inaanu xallino carqaladani iyada oo aan dedejineyno natijjooyinka barashada ee ardayda, gaar ahaa ardayda aan caddaanka ahayn. Tani waa tilmaantii caddeyd ee aan idinka helnay, sidoo kalena aan bulshadeenuna ay na soo gaarsiiyeen, muddo dheer ka hor intaan laba qaadin imtixaanada gu'gii la soo dhaafay, iyada oo aan bilownay tallaaboooyinkii qorsheynta ee lagu xaqiijin lahaa higsigaasi aan idinla wadaagnay. Tallaaboooyinkaasi waxaa ka mid ah:

- Bishii Juun ee sanadka 2022, waxaan qaadanay [hab cusub oo waxbarasho](#) iyo [manhaj cusub oo degmada dhan laga dhigayo](#) kuwaasi ku salaysan heerarka lagana taxadiray. Wuxaan hore ka ogaanay calaamado muujinaya saameynta togan ee ka soo baxaysa barashada ardayda
- Sanadkani waxaan isticmaalaynaa lacag ka badan \$16.5 malyuun loona isticmaalayo hal mar taasi oo aan ka helnay dawlada dhewe looguna tallogaly in lagu horumariyo xirfadda. Wuxaan u mahadcelineynaa maalgalinta waqtigan aan ku sameyneyno macallimiinteenaa ee lagu tababarayo maadaama aan bilaabeyno manhaj cusub
- Wuxaan sii wadnay sidii aan mudnaanta u siin lahayn addeegyada iyo gargaarka tooska ah ee la siinayo ardayda: dedejinta khabiiro dardar galiya kooxo arday gaar ah waxbarashada cusub; ballaarinta xirfadaha farsamada iyo waxbarashada farshaxanka; iyo kordhintaa maalgalinta caafimaadka la xiriira dabciga iyo xanuunada dhimirka, latalinta, iyo shaqooyinka bulshada ee lagu taageero baahiyaha aan ahayn dhinaca



waxbarashada iyada oo si fiican loo xaqiijinayo inay ardaydeenu diyaar u tahay sidii ay wax u baran lahaayeen

Waxaan leenahay qorshe iyo tallaabooyin leh aragtiyo cad oo durba shaqeynaya. Waxaan leenahay nidaamyo. Waxaan leenahay kartidii. Waxaan leenahay bulsho aan si mug leh isku kaashano. Iyada oo aan dhammaantanyo fahamsanahay “sababta.”

Iyadoo ay sababtuna tahay, inaan si dhab ah u aaminsanahay inaan himilooyinkeena aan wada gaari doono: inuu arday waliba helo waxbarasho tayadeedu sarayso, iyo caddeymo cad in aan horumar sameyneyno iyo inaan dhammaan dardar galino guusha ardayda- gaar ahaa kuweena madow, Maraykan Asalka ah, iyo ardayda aan caddaanka ahayn.

Shaqadeena ina hortaala ma noqon doonto mid aan caqabado lahayn, isla markaana in la gaaro yoolkani waa inaan dhammaanteen ka qeybqaadano. Waxaa naga go'an sii wadista horumarinta. Marka aad eegto macallimiinta hibida leh, hoggaamiyaasha, iyo shaqaalaha PPS, iyo dhammaan qoysaska iyo dhammaan bulshadeena aan isgarabsiga leenahay ee na taageerta, waxaan ku rajo weynahay in nidaamka dugsiyadeenu uu ahaan doono mid inti hore ka sii fiican ugu dambeyna meesha ka saara faraqyada fursadeed ee hore u jiray. Waxaan idiinka mahadcelinaya isgarab istaaga joogtada ah ee aad siiseen hawshani muhiimka ah.

Ma jirto hawl ka weyn ama ka degdeg badan oo ina hortaala sidii aan u xaqiijin lahayn in arday kasta oo ka mid ah ardaydeenu u guuleysan lahaa.

Guadalupe Guerrero

Guddoomiyaha Waxbarashada